



# Qorista Yoolalka iyo Ujeeddooyinka Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed ee Dhalaanka

Writing Goals and Objectives for an Early Childhood Individual Education Program - Somali version

Yoolalka iyo ujeeddooyinka ku qoran Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed ee ilmahaaga (IEP) waxu adiga iyo shaqaalahaba idin siinaya, hab aad ku cabirtaan horumarka xirfadaha tacliinta iyo shaqeynta ilmahaaga. Qorshaha Waxbarashada gaar-ahaneed ee ilmaha dugsiga xan'aanada, wa in uu ku taqasusnada isticmaalka howl maalmeedka iyo xarakaadka ilmahaaga maalin walba fasalka ku qabanayan, si loo xoojiyo xirfadaha ilmaha u baahanyihiin xagga la mucaamiltanka ardeyda kale, isku-filnaanshaha howl maalmeedka, iyo xiriir wanaagga ardeyda iyo dadka kale ee fasalka.

Waxad taqasus ku tahay ilmahaaga, waxaadna heysa akhbaaro muhiim ah oo ilmahaga ku saabsan, oo aad la wadaagi karto shaqaalah kale ee xubnaha ka ah kooxda Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed; taasi waxey ka dhigeysa xubno muhiim ka ah kooxda. Marka la qorayo yoolalka iyo ujeeddooyinka Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed, waxa jira akhbaaro yar oo muhiim ah oo in la qadariyo u baanhan. Kuwa wax aka mid:

- Natiiyadi laga helay qiimeeynti waxbarasho ee ugu dambseysay
- Waxyo akhbaaro xagga caafimadka ee aad doneyo in aad la wadaagto kooxda
- Waxyabaha ilmahaaga garanayo iyo ay qaban karaan
- Waxyo walwal ah oo aad ka qabto ilmahaaga waxbarashadooda ama kobcidooda
- Waxyo warbixin ah ee ku saabsan barnaamijka ilmahaaga xaadirka ka mid yahay

Hab aad uga fikiri karto qorista yoolalka wa inaad la hadasha macalimiinta la shaqeyn doona ilmahaaga, oo weydisa in ay ku sharaxaan jadwal-maalmeedka ilmahaaga sidu u egyahay. Markaad fiiriso xarakaad maalmeedka ee barnaamijka ilmahaaga ka qeyb qaadanayo, waxaad ka fikiri karta xarakaadka aad ka yaabto in ay dhib ku noqonayaan, adigo qadarinaya aqoonta aad u leedahay ilmahaaga. Xarakaadkan wax ka mid noqon kara:

- Isbedelka
- La mucaamiltanka ardeyda ama dadka kale
- Waqtiga cunista
- Waqtiga xasilooni u fariisadka
- Habka tacliin-barista macalinka/da

Waxaad kalo ka fikirta dhinac walba oo kobcidda ah oo aad fileyso in ilmahaaga baahi ka qabaan. Kuwan wax aka mid ah:

- Xiriirka
- Dhaqdhaqaaqa murqaha ama xubnaha yaryar
- Is maamulka sida musqusha ama cuno cunista

Waxad is weydiisa “maxaan doonaya in ilmaheygu qabtaan ama bartaan”? Markad ogaato xirfadaha ilmahaaga u baahanyihiin in ay bartaan ama xoojiyaan, dabadeed xasuuusnow Qorshaha Waxbarashada Gaar-ahaneed inta badan sanadkiiba mar aya la qora.

---

Waxa jira waxyaaba kale in la qadariya tahay marka la qorayo yoolalka iyo ujeeddooyinka:

- Ilmahaag xirfadaha ay awood u leeyihiin waqtiga xaadirka ah wa in lagu sharaxa qeybta yoolka ama qeybta Heerka Xirfadaha iyo Waxbarashada xaadirka; taso loo yaqaan PLAAFP (Present Level of Academic and Functional Performance)
- Yool walba wa in uu yahay mid la arki kara oo la cabiri kara
- Yoolalku wa in ay yihiin kuwa shaqeynaya, micnana u leh ilmahaaga ka kheyb qaadashadooda iyo isku filaaanaanshahooda dugsiga xannaanada
- Yool walba wa in uu leeyahay ugu yaraan labo ujeeddo. (Ujeeddooyinku wa talaaboyin horukac u ah gaarista yoolka)

Ujeeddooyinku wa in ay ka mid ahadaan kuwa soo socda:

- Xirfadda ilmahaaga awood u yeelan doonan in ay qabtaan
- Jawiga ay xirfadaa awood u yeelan donaan in ay ku qabtaan
- Qeynuunka lagu go'aaminayo in Ujeeddadi la gaaray
- Qiimeynta (boqolkiba inta ujeeddada la gaaray iyo qofka ma'suulka ka ah in akhbaaradaa isu soo aruuriyo)

Intey kooxda Waxbarashada Gaar-ahaneed abaabuleyso yoolalka iyo ujeeddooyinka, wa inaad ka sii fikirta howlo noocyada waxbarashada gaar-ahaneed iyo adeegyada la xiriira ayeey ilmaheeyga muhiim u ah si ay guul uga garaan yoolalka.

Xaqiiji in aad xasuusnaato:

- Xubnaha xooxda Waxbarashada Gaar-ahaneed oo idil wa in ay fahmi karaan yoolasha iyo ujeeddooyinka, oo aysan jirin kelmado maldahan.
- Shaqaalaha waxa waajib ku ah in ay cabiraan oo ay warbixin ka siyaan horumarka ilmahaaga ka gaarayo yoolasha, ujeeddooyinka iyo manaahijta dugsiga xannaanada. Adigana wa ina aad guriga iyo jaaliyadda ku arki karta horumarka.
- Shaqaalaha wa in ay ku tusaan hab aad ilmahaaga uga caawin karto waxbarashada marka aad guriga joogtan

Wqtiga lagu wareysanayo ee la isu soo aruurinayo akhbaarada ku saabsan waxyaabaha si wanaagsan ilmahaaga ugu shaqeynaya, waxyaabaha ilmahaagu ay dhib ku qabaan, iyo rajada aad ilmahaaga u heysa, xubnaha kooxda intooda kale wa iney akhbaarada ku daraan waxy aqoon ah oo ay u leeyihiin kobcidha ilmaha iyo xeelad waxbaris ah ee ku saleysan baaris. Dabadeed guud ahaan kooxdu waxey qori karta yoolal iyo ujeeddooyin ilmahaaga u carbinaya dugsiga xanaanada.